Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

# HAGISTA MACMIILKA EE KU SAABSAN WARAYSIGA

Waxaa laguugu yeeray waraysiga Waaxda socdaalka. Si taxaddar leh u akhri tilmaanbixintaan, taasoo kuu sheegeysa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga la xiriira waraysiga lagula yeelanaayo. Haddii aad wax su'aal ah ka qabto tilmaanbixintaas, waxaad bilowga waraysiga su'aashaada u soo jeedin kartaa shaqaalaha Waaxda socdaalka.

## Waa maxay ujeedada waraysiga?

- Waxaad Finland ka codsatay magangelyo. Waaxda socdaalku si dhab ah uma falanqaynayso codsigaaga, kahor inta laga ogaanaayo, waddankee ayaa ka mas'uul ah falanqaynta codsigaaga.
- Waraysigaan waxaa lagu caddaynayaa arrimaha saamaynta ku yeelanaya in codisgaaga la falanqeeyo iyo in la iska daayo oo aan wax baaritaan ah lagu samaynaynin iyo inkale. Waraysigaan laguma caddaynaayo waxyaabaha salka u ah magangalyoddoonista.
- Hadba dalka lagu falanqaynaayo codsigaaga, waa mid ku salaysan, nidaamka Dublin ee ah sharciga u degsan waddamada ku bahoobay ururka midowga yurub.
- Iyadoo lagu salaynaayo nidaamka waraysiga-Dublin, ayay Waaxda socdaalku caddaynaysaa, dalka ka mas'uulka ah codsigaaga, iyo in codsigaaga lagu falanqaynkaro Finland iyo inkale.
- Waddamada Dublin waa dhammaan kuwa ku jira ururka midowga yurub iyo dalalka kala ah Norwey, Swizerland, Iceland iyo Liechtenstein.
- Sidoo kale baaritaanka codsigaaga waa la iska dayn karaa, haddii aad badbaadada caalamiga ah ka heshay dal kale oo ka mid ah waddamada Yurub. Markaa arrinka taagan ma ahan nidaamka Dublin. Xaaladda sidaan oo kale ah, waxaa waraysiga lagula yeelanayo baaritaan ama caddayn lagu samayn doonaa, waa maxay sababta ay tahay in codsigaaga baaritaan loogu sameeyo dalkan Finland gudihiisa.
- Haddii aad dooneyso in aad ciqaamadda ku codsato sababo kale, waa in aad samaysaa codsi gaar ah oo lacag la bixinaayo. Waxaana tusaale ahaan sababahaas ka mid noqon kara shaqo ama xiriir qoyseed.

## Waa maxay xuquuqaha aad leedahay waraysigaan dhexdi-isa?

- Waxaad xaq u leedahay waraysigaan inta uu socdo, inaad qabsato qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada. Qareenku wuxuu kaga soo qaybgali kara waraysiga oo kaliya adiga rabitaankaaga kuu gaarka ah.
- Waraysiga waxaa jooga turjubaan. Shaqada turjubaanku waa in uu si dhexdhexaad ah isagoo aan cidna la jirin, uu u turjumaa dhammaanba wixii waraysiga dhexdiisa lagu sheego. Turjubaanku wuxuu noqon karaa mid goobta waraysigu ka dhacayo jooga, ama khadka telefoonka ku turjumaaya, ama fiidiyoow ahaan u turjumaaya.
- Qofka waraysiga qaadaaya, turjubaanka iyo qareenkuba waxaa saaran waajibka ah in ay sirta qariyaan, taasoo loola jeedo in aanay u sheegi karin cid kale oo arrinkaan ka baxsan wixii ay ka maqleen waraysiga dhexdiisa, xitaa xubnaha qoyskooda uma sheegi karaan.
- Dukumintiyada adiga kugu saabsan asal ahaan waa kuwo sirtoodu qarsoon tahay.

## Waa maxay waajibaadka ku saaran adiga waraysigaan dhex-diisa?

- Waa arrin ay dantaadu ku jirto, in aad si xaqiiqda ku salaysan oo run ah u sheegto dhammaanba arrimaha saamaynta ku yeelanaaya waraysiga.
- Sidoo kale waxaa ay dantaadu ku jirtaa in aad sheegto arrimaha adag ama dhibka badan. Waxaana dhici karta in arrimahaasi ay xal muhiim ah u yihiin codsigaaga.
- Haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn, ha isku dayin in aad jawaabta adigu iska allifato ama iska hindisto, bixinta macluumaad khaldan waxaa ay daciifineysaa ama hoos u dhigaysaa rumaysashada waxyaabaha aad sheegtay.
- Marka lagu waraysanaayo waxaad sheegtaa macluumaadka aqoonsigaaga shakhsiy-adeed (magaca iyo taariikhda dhalashada) ee saxda ah. Waxaad kagadaal macluumaadka shakhsi ahaaneed ku beddali kartaa, marka aad keento dukuminti dawladeed la aamini karo oo ku saabsan macluuumaadka shakhsiga.
- Bixinta macluumaad shakhsiyayeed khalad ah waa dambi sida uu sharcigu dhigaayo.
- Waxaad ogaataa in siinta macluumaad shakhsiyadeed aan sax ahayn ama qarinta macluumaadkii saxda ahaa ay kugu keeni kartoin lagaala noqdo sharcigii oggolaans-haha ee lagu siiyay, islamrkaana waxaa ay dhibaato ku noqonaysaa oo adkaynaysaa falanqaynta arrimaha kale ee adiga ku khuseeya.

## Sidee ayaa waraysiga loogu soo diyaargaroobayaa?

- Waraysiga ka hor soo akhri oo u kuurgal dhammaan tilmaanbixinta iyo qoraallada ay hawlwdeennada dowladdu ku siiyeen. Waxaa aad muhiim u ah in aad iska akhriso warbixinta ku saabsan nidaamka Dublin. Haddii aadan heysan qorraallada ku saabsan warbixintaasna, waxaad ka heli kartaa bogagga internetka ee Waaxda socdaalka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/esitteet-ja-julkaisut. Warbixinnadu waxay ku hoos ku jiraan cinwaanka "Turvapaikka ja Dublin-menettely" Nidaamka Dublin iyo magangalyod-doonista.
- Haddii aad doonayso in turjubaanku uu noqdo qof dumar ah ama nin, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga waqti ka horreeya xilliga wareysiga. Xerada qaxootiga ayaa codsigaaga waxay u soo gudbin doonaan Waaxda socdaalka (imaagareeshinka).
- Haddii xaaladdaada caafimaad ee jir ahaaneed ama nafsad ahaaneed ay tahay mid saamayn ku yeelan karta waraysiga, waxaad arrinkaas u sheegtaa shaqaalaha xerada qaxootiga. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa haddii aad u oggolaato waxay arrinkaaga kala xiriirayaan Waaxda socdaalka, kahor inta aan waraysigu dhicin.
- Hore u soo qaado cuntadaada ama lacag aad cunto ku iibsato.
- Hore u soo qaado wixii daawo ah ee aad maalinkaa u baahan tahay.
- Hore u soo qaado dukumintayada iyo caddaymaha la xiriira codsigaaga.
- Ilmaha ha u soo kaxaysan waraysiga, haddii aan iyaga laftigooda loogu yeerin waraysiga. Haddaad u baahan tahay cid ilmaha kuu haysa xilliga aad waraysiga leedahay, waqti fiican oo hore u sheeg arrinkaas shaqaalaha xerada qaxootiga.
- Ku imoow waqtiga laguu qabtay. Kuna soo talaggal waqti kugu filan oo safarkaaga ah. Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa ku siinaaya tilmaanbixinta ku saabsan qaabkii aad ku tagi lahayd Waaxda socdaalka (imaagareeshinka).

## Waxyaabaha lagaa doonaayo in aad samayso maalinka waraysiga ee waaxda socdaalka gudaheeda

- Marka aad timaaddo xarunta Waaxda socdaalka, waxaa lagugu samayn karaa baaritaan xagga ammaanka ah.
- Waxaad tustaa waardiyaha waaxda socdaalka, kaarkaaga aqoonsiga ee xerada qaxootiga.
- Qolka ku sugitaanka ee waaxda socdaalka waxaa imaan kara oo kaliya dadkawaraysiga loogu yeeray, iyo dadka kale ee hore ballanka ula lahaa Waaxda socdaalka.
- Haddii aad doonayso inuu ku soo raaco qof caawiye ah, wuxuu waraysiga kahor arrinkaas qaab qoraal ah u soo weydiin karaa Waaxda socdaalka. Xaaladaha kale ee arrinkaan ku saabsan qofka waraysiga qaadaya ayaa go'aan ka gaari kara marka waraysiga la bilaabaayo, in qofka caawiyaha ah uu ka qaybqaadan karo iyo inkale.

Qofka caawiyaha ah ma ahan qareen ama looyar, kamana qayb qaadan karo caddaynta arrimaha laga hadlaayo.

- Qofka waraysiga qaadaaya waa shaqaalaha Waaxda socdaalka.
- Qofka waraysiga qaadaya ayaa ka soo kaxaynaya qolka ku sugitaanka.
- Waraysiga waa la duubaayaa. Waxaa intaas dheer oo qolka ku jirta kaamarad wax duubaysa.
- Haddii loo baahdo inta waraysigu socdo, waxaa la qaadan karaa xilliyo biririf ama nasasho ah. Adiga laftigaaga markii aad u baahato waad codsan karaa biririfta ama nasashada.

## Maxaa dhacaaya waraysiga dhexdiisa?

- Marka ugu horraysa qofka waraysiga qaadaaya wuxuu kuu sheegayaa, waxyaabaha la samaynaayo waraysiga dhexdiisa, wuxuuna hubinayaa in aad fahamtay xuquuqdaada iyo waajibaadka lagugu leeyahay iyo inkale. Haddii aadan waxyaabaha qaarkood fahmin weydii qofka waraysiga qaadaya. U sheeg haddii aadan fahmin hadalka turjubaanka.
- Waraysi qaaduhu wuxuu ku weydiin doonaa arrimaha soo socda:
  - Aqoosigaaga shakhsiyaydeed
  - Macluumaadka ku saabsan  halka aad ka degganayd dalkaaga
  - Macluumaadka ku saabsan xubnaha qoyskaaga iyo qaraabadaada ku nool dalkaagii iyo waddamada yurub
  - Macluumaadka ku saabsan ciqaamaddaha, fiisooyinka iyo codsiyada magangalyoddonka ah ee waddamada kale
  - Macluumaadka ku saabsan joogitaankii yurub gudaheeda kahor intaadan imaan Finland
  - Waddooyinkii ama marinnadii safarkaada ee aad u soo martay dalkan Finland.
  - Sababaha aan iyaga awgood laguugu celin karin dal kale
  - Sababaha ay tahay in codsigaaga lagu falanqeeyo Finland gudaheeda, haddii aad badbaadada caalamiga ah ka heshay dal kale
  - Sidee ayaad u aragtaa dal ka saarista iyo u diidista dal soo gelistaba.
- Si daacadnio leh uga jawaab su'aalaha lagu weydiinaayo. Ha allifin jawaabaha. Sheeg haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn.
- Ugu dambayntii turjubaanka ayaa kuu akhrinaaya dukumintigii uu qoray qofka waraysiga qaadaayay. Haddii aad dareento wax khalad ah, waa in aad u sheegto waraysi qaadaha. Sidoo kale dukumintiga la qoray wax dheraad ah waad ku dari kartaa. Intaa dabadeed dukumintiga waa la saxiixayaa, waxaadna heleysaa koobiga dukumintigaas.

## Maxaa dhacaaya waraysiga kaddib?

- Nidaamka-Dublin waxaa lagu qeexaa sababo kala duwan, kuwaasoo iyadoo lagu salaynaayo uu waddan ka mid ah wadamadaas mas'uul ka yahay falanqaynta

codsigaaga. Sababahaasi waxaa ay kala yihiin: 1) xubnaha qoyska ee jooga waddamada Dublin, 2)Ciqaamadda ama fiisaha waddamada Dublin, 3)Joogitaan ama soo dhexmarid waddamada Dublin, 4)Codsigii hore ee magangalyoddoonista qaxootinimo. Waaxda socdaalku waxaa ay hubinaysaa dhammaanba sababahaas, iyadoo raacaysa nidaamka-Dublin laga dejiyay ee sida ay u kala muhiimsan yihiin.

- Haddii aad doonayso in aad ka gadaal soo gudbiso caddaymo dheeraad ah, waxaad ka soo dhigtaa qoraal ahaan. Arrinkaaga telefoonka ugama wada hadlayno, waayo ma hubsan karno aqoonsiga shakhsiyadeed ee qofka na soo wacaaya.
- Waaxda socdaalku waxaa haddii loo baahdo ay dalkaaga ka dalban kartaa caddaynta ku saabsan dhab ahaanta ama asal ahaanta dukumintigaaga. Hawlwadeennada dowladda dalkaaga ma ogaanaayaan arrinkaan, caddaynta arrinkaasna wax khatar ah uma keeneeyso adiga iyo ehelkaaga toonna.
- Go'aanka arrinkaaga ku saabsan waxaa lagu salaynayaa macluumaadkii aad ku sheegtay waraysigii lagula yeeshay iyo wixii kale ee caddayn ah ee aad u soo bandhigto.
- Haddii la go'aamiyo in laguu celiyo dal kale, waxaad racfaan ka qaadashada go'aankaas u gudbin kartaa maxkamadda. Sidoo kale waxaad codsan kartaa in aad sii joogto Finland, tan iyo inta racfaanka laga falanqaynaayo.
- Haddii codsigaaga aan wax baaritaan ah lagu samaynaynin, dib ayaa laguu celin karaa waxaana la amri karaa diidmada dal soo gelista ee ku saabsan, soo gelsta dalkaan Finland iyo wadamada uu ka dhexeeyo heshiiska Schengen.